Erayga iyo Maanta Somtwt 0156
Xernimada

Dhegaystayaal waa barnaamijkii toddobaadlaha ahaa oo aad ka maqli jirteen saacadahan oo kale isla idaacaddan. Waa barnaamij aynu kaga hadalno ama ku soo qaadanno mawduucyo kala duwan oo xiiso leh toddobaad waliba. Mowduucayaga caawa wuxuu ku saabsan yahay **Xernimada**. Barnaamijkan waxaa inoo soo diyaariyey hay'adda, Erayga iyo Maanta, waxaana waxbariddan isku soo dubba-riday wadaadka la yiraahdo Bawlos. Sii dhegayso barnaamijka ka hadlaya **Xernimada**. Balse intaynaan idiin billaabin aynu wada dhegaysanno qasiiddadan.

Song: Reel---Cut----

Mid ka mid ah weedha ugu farxadda badan ee ugu qoran masiixiyiinta Qorniinka waa erayga Xernimada. Axdiga Cusub dareen saa'id ah ayaa la siiyey markay joogto waxa **xer** uu ka macne yahay iyo sida loo noqdo **qof xer** ah oo raacsan Masiixa. Haddaan soo koobo, erayga xer wuxuu ka macne yahay arday.

Haatan, ka hor intaadan oran ma ardaynimay ka macne tahay, waayo dadka oo dhan ma jecla inay waxbarasho ku noqdaan, ayaanay weliba ka fakaraynin khibradaha wanaagsan, oo dooni maayaan inay waxbarasho dib ugu laabtaan marba haddii ay dhammeeyaan. Sida xaqiida ah, inaad arday u noqoto Ciise ayaa ah wax xiiso badan.

Maxaa wacay, wax aad kororsanayso oo kaliya maahan xigmad, waase wax keenaya isbeddel, xiiso, iyo koritaan, oo waxaad baranaysaa sidii aad ku noqon lahayd Ciise oo kale. Taasi waa waxaad hadiyado ka helayso, iyo waxyaabo noloshaada xamaasad geliya. Waxaan ka hadlaynaa maanta waxa la socda xernimada iyo waxa dhaca markii qofku uu xer noqdo.

Haddaba bal aan shaaca ka qaado in dad badani ku wareeraan ama isku qasaan laba eray oo isku si u dhawaaqaya. Waa apostle iyo disciple, ama rasuul iyo xer. Rasuulku waa qof Ciise Masiix doortay, oo waxay ahaayeen dad aan badnayn.

Haddaba macnaha xer ayaa noqonaysa arday, oo Masiixuna wuxuu lahaan karaa arday badan oo dunidan joogta. Markaasina, hubaashii waxaad noqon kartaan xer ka mid ah kuman-yaalka xerta ah ee ku qoran kitaabka Axdiga Cusub. Dhammaadka kitaabka Axdiga cusub, oo ah kitaabka Muujintii ayaa lagu sheegayaa kumanaan, iyo kumaankum ka mid noqday xerta Ciise.

Maanta waxaa dunida joogta ugu dhowaan 1 bilyan oo dad ah oo ku nool dunida oo sheeganaya inay yihiin masiixiyiin. Haddii aad tiraahdo anigu waxaan ahay masiixi, laakiin aadan waxba ka aqoon waxa **xer** uu ka macne yahay, ayaa sida lagu rajo weyn yahay maanta wax badan oo wanaagsan ka ogaan doontaa sidii aad sare ugu qaadi lahayd arday nimadaada, oo aad sida Masiixa oo kale u noqon lahayd.

Haddii markaa aad jeceshahay inaad wax badan ka ogaato, oo aad is leedahay, sidee ayey xernimadu noqon doontaa, ayaan kula wadaagayaa figrado ku saabsan waxa xernimo ay ka macne tahay. Ciise ayaa wuxuu bixiyey amarkan aasaaska u ah masiixiyiinta oo lahaa, sida ku qoran Injiilka sida Matayos u qoray 28:19-20,oo leh:

"Haddaba taga, oo quruumaha oo dhan xer ka dhiga, oo ku baabtiisa magaca Aabbaha iyo Wiilka iyo Ruuxa Quduuskaa, oo bara inay dhawraan wax walba oo aan idinku amray."

Haddaan idiin jilciyo xer waa qof lagu baabtiisay magaca Masiixa, oo wax bartay, sameeyey daraasaad, gaamuray, oo ku socda

tallaabooyinka Masiixa. Haddaba, baabtiisku ha horreeyo ama waxbarashadu ha horrayso, laakiin labadaas arrin waa muhiim. Haddii qof dhallaan ah la baabtiiso, waa wax wanaagsan! Laakiin weli qofkaasu xer ma uusan noqon. Dhallaanku wuxuu u baahan yahay inuu marka hore koro, oo wax barto, oo miraha yar ee rumaysadka ah ee lagu dhex beeray waxay u baahan yihiin inay kobcaan xagga garaadka, oo fahmaan xernimada inta ay korayaan.

Haddaba xernimadu waa hannaan soconaya intaad nooshahay. Marka qofi weynaado, oo maqlo wacdiska hadallada Ilaah, waa inuu ka baaraan dego. Laga yaabo inaad na dhegaysanayso oo aad fahmayso mabda'a Ciise ee ah inuu yahay badbaadiyahaaga, oo taasna aad maanta maqashay markii ugu horraysay. Haddii markaas aad qirato dembiyadaada, oo tiraahdo waxaan doonayaa nabaadiinada magaca Masiixa, oo aad tiraahdo, waxaan doonayaa inaan jannada galo, Rabbiga ayaa ku siinaya rumaysad.

Baabtiiskaagana waa go'aan kaa yimid, Ilaahna wuxuu kuu shaabadaynayaa inaad tahay dhallaankiisa, wuxuuna adkaynayaa rumaysadka aad Ilaah saaratay. Markaasina, wuxuu noqonayaa rumaysad shaqeeya. Ahmiyaddu waxay tahay in xernimada aalaaba ay labo tahay, waana makhuuriska magaca Ciise iyo waxbaris iyo koritaan wada socda.

Marka ay joogto in Masiixa lagu koro xer ahaan, waxaa sal u ah Anshax. Anshuxu waa qayb weyn oo ka mid ah nolosha qofka Masiixiga ah. Markaa la dooni maayo inaad si hoosaysa u fakarto oo tiraahdo, "Dishibiliinku waa dhib badan yahay, oo lama kaamil karo." Haddaba, waa in lagu noqnoqdo halkii aad seeraysay isla sida markaad doonayso inaad jirkaaga dhisto ay khasab

tahay inaad jimicsi aaddo, oo markii aad doonayso inaad maskaxdaada dhistana aad buugaag u akhriso oo wax u barato, markii aad caafimaadkaaga saa'idisana, aad cunno wanaagsan hesho. Markaa wax kasta ee ay tahay inaad guul ka keento, waxaa ka horreeya inaad Anshax la raaco leedahay. Hadday tahay, guurkaag, iyo dhaqaalahaaga, ama koriska carruurtaada.

Discipline, ama anshax wuxuu ka macne yahay inaad ku socoto qorshe, oo aadan ka beyrin. Iyadoo aan fikirkaas daba socodo, waxaa jira saddex sheey oo ku qoran Injiilka sida anshaxa rumaysadka masiixiyiinta. Waxaan doonayaa markaa inaan ka hadlo saddexdaas.

Tan kowaad waa salaadda, tan labaadna waa waxbaris, tan saddexaadna waa markhaatifurka Masiixa iyo xernimada Ciise. Waa in saddexdaas la yeelo. Waxaan ku hor maryaa Injiilka sida Yooxanaa u qoray 15:7, waxaana qoran:

"Haddaad igu jirtaan, oo ay erayadayduna idinku jiraan, weyddiista waxaad doonaysaanba, waana laydiin yeeli doonaa."

Kani maahan ballan wax waliboo aad weyddiisato aad helayso. Waxayse ka macne tahay, haddii aad Ilaah u go'do, oo aad ku jirto doonista Ilaah, oo aad doonayso ammaanta Ilaah, iyo in doonistiisa laga sameeyo noloshaada, ayaa taasi la mid tahay sida wiil yar oo doonaya in loo gado wax ay waalidku la jeclaayeen. Bil-xaqiiqa Ilaah wuu aqbalayaa baryadaas.

Sidee buu Ilaah kuu hor joogsanayaa marba haddaad doonistiisa samaynayso. Waxaanan Salaadaha ku baranaynaa xiriirka iyo la hadalka Masiixa maalin waliba. Taasina waa aasaaska baryada, oo ah in Ilaah lala hadlo. Waa wax caadi ah in qofka masiixiga ah mar waliba Ilaah u sheego dembiga uu galayo

maalin waliba, iyo weliba inuu Ilaah u mahad celiyo. Taasina waxay qayb ka noqonayaan salaaddaada. Barakada la helayo waxay tahay, markaan ku takhasusno salaadda, innagoo yeelanayna xirfadda hadalka. Waxaan kaloo yeelanaynaa awood aan salaadda ugu samayno qaab ka farxiya Ilaah. Laakiin barakada salaadda waa is-hoosaysiinta, ama inaadan kibir badnaan.

Waxaan bilaabaynaa inaan garanno sida aynu ugu baahan nahay inaan Ilaah ku xirnaanno. Tan labaad waa wax baris sida ku qoran Injiilka sida Yooxanaa u qoray 15:10, oo leh: **"Haddaad qaynuunnadayda xajisaan, jacaylkaygaad ku jiri doontaan, sidaan qaynuunnada Aabbahay u xajiyey, oo aan jacaylkiisa ugu jiro."**

Qaynuun wuxuu ka macne yahay inaad barato waxa qaynuunadiisu yihiin. Waxaad u baahan tahay inaad wakhti geliso akhriska Injiilka, oo aad wax badan ka barato kitaabka Qoduuska ah ee Baybalka. Taas waa khasab si aad fursad u siiso Ruuxa Qodduuska ah, oo uu noloshaada kaga shaqeeyo, oo uu kuu siiyo aqoonta Masiixa.

Markii aad caadaysato barashada kitaabka, kula noqon mayso oo keliya in Ciise fog yahay, laakiin wax badan ayaad isaga ka ogaanaysaa, oo barakada ay leedahay akhriska kitaabka ayaa kuu soo dhowaynaya Ilaah. Waxaad dareemaysaa inaad ku jirto jacaylka Masiixa, waana dareen wanaagsan.

Haddii ay kugu adag tahay inaad hesho kitaabka, oo ah sababta aynu idaacadda idinkala wadaagno Injiilka, ayaa waxaa jira dad weli aan luuqaddooda lagu qorin kitaabka.

Waana tan aynu doonayno inaan Masiixa idiinku keenno, si aad wax badan uga maqashaan, maahan oo keliya inaad akhrisaan,

laakiin waad maqli kartaan, oo Ruuxa Qoduuska ah ayaa niyadihiinna ka shaqaynaya. Taasina, waa mid ka mid ah waxa aynu samayno, markaan soo dayno idaacadda. Waxaan idinla wadaagnaa akhbaarka wanaagsan ee Ciise Masiix, oo markaas joogto u samaysaan, oo aad dhegaysataan Hadallada Ilaah way idiin fududaanaysaa barashada.

Haddaad caadaysataan dhegaysiga, mar kasta waxbarashadu way fududaanaysaa. Waxaa kaloo fududaanaya daraasaadka Hadallada Ilaah, wuxuuna ruux ahaan dhisayaa kitaabku garaadkaaga. Anshaxa saddexaad waa markhaati furkaka.

Waa in aad qof kale kala hadashaa wax ku saabsan Masiixa. Waxaanad sidan ku samaynaysaa wel wel la'aan, oo hadba inta goor ee aad ka hadasho Masiixa ayaa fududaynaysa markhaati-furka aad u samaynayso Masiixa, ilaa marka dambe ay caadi kuu noqoto. Haddaba Injiilka sida Yooxanaa u qoray 15:8 ayaa waxaa ku qoran:

"Waxaa Aabbahay ku ammaanmaa inaad midho badan dhashaan, waxaadna noqon doontaan xertayda."

Markaas Ilaah u markhaati-furayso, waxaad muujinaysaa inaad tahay xerta Masiixa. Sida badan waa wax shaqeeya inaad isku keento ficillo jacayl ah, oo ah wax qayracaadi ah, waxaanad ku daraysaa ficil jacayl oo Masiixa loo hadiyeynayo, iyo sida qofka aad la hadlayso uu ku garan karo Ciise, waxayna noqonaysaa markhaatifur xoog leh.

Haddaba, markaan waxyaalahaas oo dhan ee aan idinkala hadlay ay cad yihiin, haddana dooni maayo inaad tirhaahdo, "Kuma wanaagsani salaadda, kumana wanaagsani waxbarashada, iyo markhaatifurka." Waxaadse tiraahdaa, "Waan korayaa, oo ku wanaagsanaayayaa waxbaridda iyo markhaatifurka." Ilaah wuxuu

doonayaa inuu ku gaarsiiyo booskaaga, oo ku horumariyo, oo aad noqoto mid ka wanaagsan halkii uu joogay sanad ka hor, oo wuxuu doonayaa inaad korto. Arrin kale ayaa wuxuu yahay, in Ilaah ku anshixinayo, oo wuxuu noloshaada u soo dirayaa tijaabo, si laguu gilgilo, oo aad ku gaamurto. Ilaah dooni maayo inaad war-mooge ahaato, isla sida waalidka wanaagsan oo aan doonayn in dhallaankoodu aanu dhib arag, kuwaasina ma koraan, ma shaqeeyaan, oo mana gaamuraan. Ilaah wuxuu ku siinayaa mixno iyo tijaabo si laguu anshixiyo, oo aad u caqliyeysato.

Waxaan rajaynayaa in lagu wacyi geliyey oo lagu dhiirrogeliyey oo aad noqotay xer, iyo ardaygii Ciise, si aad u tukato, wax u barato, oo ugu markhaatifurto Masiixa. Waxaad ogsoon tahay in Ciise mar waliba sood howeeyo dadka toobadkeena, kuwa aan raja-dhigin, iyo dadka doonaya inay sidiisa oo kale noqdaan. Waxaad og tahay waxa loogu yeeray? Waxaa loogu yeeray xernimo, oo Akhbaarka Wanaagsan ee Ciise Masiix waa in magaciisa loo yeerto iyo in dembiyada laga toobadkeeno, oo xirtiis ala ahaado.

SONG: REEL—CUT--

Waxaa intaas noogu soo dhammaanaya barnaamijkeennii caawa, habeenka xiga ayaannu halkii ka sii wadi doonnaa. Waxaa barnaamij kan oo kale ah ka maqli doontaan toddobaadka dambe (saacadahan oo kale isla idaacaddan) Waxaad waraaqaha noogu soo qortaan P.O.Box 21514, oo koodku yahay 00505. Farriimaha SMSka waxaad noogu soo diri kartaan tel: 0707032060. Farriinta waxaad ka hor-marinaysaan Barnaamijka Soomaaliga, dabadeedna waxaad qortaa telefoonka oo ah 0707032060.